

Cunsuriyada iyo midab-takoorka waa xaqiiqada bulshada taasoo taabaneyso qeyb kasta oo kamid ah nolosh.

■ Erayada, ficilada iyo habdhaqanka isir naceybka oo kaliya kuma eko in si toos lagu soo abaaro. Waxaa kaloo jira cunsirinimo maalin walba ah, «sida mid qiyaano ah takoorid jinsiyeed, inlagu yaso, lagu bahdilo, sixun laguula hadlo».

■ Midab-takoorida waxey noqonkartaa:

- Helitaanka shaqo, ama lagaa sooceyriyo shaqada;
- Helitaanka aadka loogu baahanyah sida (guryaha, deenka bangiga, waqtiga firaaqada);
- Helitaanka adeegyada dadweynaha (waxbarashada iyo xirfadaha).

Waa muhiim in aad ogaato oo aad cadeyso xaquuqdaada.

Waa muhiim inaad kumarqaati furto haddii aad lakulanto ama adiga lagugu sameeyo xaalad cunsirinimo iyo midab-takoorid.

Wixii balan ah, kala xiriir cinwaanada hoos kuqoran:

Service of intercultural cohesion

Service de la cohésion
multiculturelle - COSM:
Place de la Gare 6
2300 La Chaux-de-Fonds
Tél. +41 (0)32 889 74 42
Fax +41 (0)32 722 04 04
Email : cosm@ne.ch

COSM Offices:

La Chaux-de-Fonds

Place de la Gare 6
2300 La Chaux-de-Fonds
Monday to Thursday: 1:30-5:00 pm

Neuchâtel

Rue de Tivoli 22
2000 Neuchâtel
Monday to Thursday: 1:30-5:00 pm

Fleurier

Rue du Temple 8
2114 Fleurier
Thursday: 1:30-5:00 pm





Si aad wax badan u ogaatid:

Service of intercultural cohesion

Service de la cohésion
multiculturelle - COSM
www.ne.ch/cosm

Federal Commission against Racism

Commission fédérale
contre le racisme CFR
Inselgasse 1
CH-3003 Berne
tél. +41 58 464 12 93
ekr-cfr@gs-edi.admin.ch
www.ekr.admin.ch

Service against Racism


Service de lutte contre le
racisme (SLR)

General Secretariat DFI

Secrétariat Général DFI
Inselgasse 1
CH-3003 Berne
Tél +41 58 464 10 33
ara@gs-edi.admin.ch
www.slr.admin.ch

www.ne.ch/cosm





XAQUUQDA

CUNSURIYADA

MIDAB-TAKOORKA

CUNSURIYADA

MIDAB-TAKOORKA

OGOW

XAQUUQDAADA

MIDAB-TAKOORKA

MAXAA LASAMEEYAA HADII AAD LAKULANTO XAALAD CUNSIRINIMO AMA MIDABTAKOOR ?

Matahay dhibane lacunsiriyeeyay ama marqaati qof la midab-takoora? Madareentaa in lagu takooray asal ahaantaada, diintaada ama midab-kaaga, shaqsi, urur, shirkad, adeega dadweynaha? Waxaad la xiriirkartaa xarunta isku-xirka Dhaqamada kaladuwan (COSM) wixii macluumaad, talo iyo tilmaamid ah.

Shaqaalaha xarunta layiraahdo COSM waxey diyaar uyihiin:

- In lagu dhageysto
- La aqoonsado xaaladda cunsirinimo
- In lagu siiyo warbixino iyo talooyin si aad cadaalad uhesho
- Saad uheshid taageero maamul
- Laguu soo bandhigo dhexdhexaadis

Wadatashiga waxaa lasiiyaa qofkasta oo dhibane ah ama marqaati u ah xaalad cunsirinimo ama midab-takoora, ayadoo latixraacayo dega-naashaha uu heysto. Watatashiga waa bilaash waana qarsoodi oo cidna looma sheegaayo, waxaana lagu qaban turjumaan, haddii loobaahdo.

SHAQADDA AYQABATO COSM

Himilooyinka COSM ayaa masuul ka ah isku dubaridka siyaasadda isdhexgalka gobolka Neuchâtel. Hawlgalkeeda iyo adeegyadeeda waxaa qeexaya sharciga isdhexgalka iyo wadajirka dhaqamada kala duwan (RSN 132.04).

Ujeedada sharcigani waa in la hormariyo **wada jirka bulshada, sinaanta sharafta iyo wacnaanta** dhamaan dadka kunool gobolka Neuchâtel, gaar ahaan iyada oo loomaraayo xiriir iswaafajin iyo isfahamka ka dhaxeeya dadka wadanka udhashay iyo ajnabiga ama soogalootiga.

Waxey dhiirgalisaa in la helo xal isdhexgal dhaqameed, taasoo loogu talagalay iney kaqeybqaataan bulshada asal ahaan kasoojeeda soogalootiga, si gabi ahaaneed, **si ay u hormariyaan sinaanta xaquuqda iyo waajibaadka iyo sidookale cunsirinimo la'aan** qofkasta ookujira xadka wada-tashiga iyo sharciga.» (Qodobka. 1).

Gobolka Neuchâtel wuxuu rabaa inuu noqdo mid kudayasho mudan marka la eego maamulda kaladuwan sida 2018, waxa ay dajisay qariirad loogu talagalay maamulka sinaanta taas oo u furan kala duwanaashaha, iyada oo socondoonto caawimaad, wacyigalin iyo aqbaar kusaabsan (Isbuuca neuchâtel kahortaga cunsirinimada, Neuchâtoi, maalinka qoxootiga).

Si aad waxbadan uga ogaatid:



SHARCIGA MAXUU KAQABAA?

Suiska, cunsirinimada iyo midab-takoorka waa ka mamnuuc sida sharciga uu dhigaayo.

Falalka iyo dabecadaha cunsirinimo iyo sidoo kale midab-takoora waa danbiyo lagu muteysanaayo cinqaab sida sharciga uuqabo iyo kicinta naceebka jinsidiyadeed.

Hadaba, sida uu dhigaayo qodobada. 261bis xeerka cinqaabta (CP) et 171c xeerka cinqaabta militari (CPM), **falalka ka dhigan in sidad loo diido**, ama si maldahan, **xaquuqda iyo sinaanta** shaqsiyaadka qaarkood hadii lagu midab-takoora kalarkooda jirka, qabiilkooda, diintooda ama dooqooda galmada **waxey leeyihiin cinqaab**, sidoo kale diidmada bixinta adeegyada ama alaabta loogu talagalay isticmaalka dadweynaha sababo cunsurinimo.

MUHIIMADA AY LEEDAHAY IN LASHEEGO IYO MARQAATI LAGA NOQDO SI LOOGA HORTAGO CUNSURINIMADA IYO MIDAB-TAKOORKA

Xogta kiisaska cunsurinimada iyo midab-takoorka waxey kaqeyb qaadaneysaa kormeerka qaran ee la dagaalanka isir naceybka. Waa muhiim in lasheego /ama laga warbixiyo kiisaska aad la kulanto.

COSM waa xubin ka mid ah shabakadaha xarumaha latalinta ee dhibanayaasha cunsuriyada dalka Suisse. Humanrights.ch* waa hay'adda isku xirka shabakadan oo sanad walba soo gudbisa dhamaan dhacdooyinka cunsuriyada ah iyo noocyada kala duwan ee takoorka ee usoo gudbiso xurmaha la taliya yaasha.

Sanad walba, warbixin tafaf tiran ayaa waxaa si wada jir ah u daabaca Humanrights.ch iyo Guddiga Federaalka ee u qaabilsan midab-takoorka (CFM).

*Sharciga danbiyada ka hortaga midab-takoorka wuxuu hirgalay sanadka markuu ahaa 1er janvier 1995. Ilaa iyo 1er juillet 2020, waxaa lagu soo kordhiyay takoor kasta oo ku saleysan nooca galmada.

Waxaad halkaan kaheli kartaa heerarka danbiyada: <https://www.humanrights.ch/fr>